

# Doorashada Senedd iyo isbeddeldada Xubnaha

**Wales waxay leedahay Baarlamaan iyada leedahay – Senedka. Laga bilaabo doorashada 7da May, waxaad arki doontaa isedelo qaar.**

Waa kuwan waxa aad u baahan tahay inaad ogaato:

- **96 Xubnood:** Senedd wuxuu yeelan doonaa 96 xubnood halkii uu ka ahaan lahaa 60.
- **Nidaamka cusub ee codaynta:** Qof kasta oo da'diisu tahay 16+ hadda wuxuu yeelan doonaa hal cod, isagoo dooranaya xisbi siyaasadeed ama murashax madaxbannaan.
- **Degaan-Doorasho cusub:** Wales waxay yeelan doontaa 16 degaan-doorasho. Degaan-doorasho kasta waxay dooranaysaa lix xubnood.
- **Sharciyo cusub:** Qof kasta oo u iskusharaxa doorashada waa inuu ku noolaado Wales.

Senedd Cymru
Welsh Parliament

## U bood:

- Maxay tani muhiim u tahay?
- Imisa Xubnooda ayay Senedd  lahaan doontaa?
- Sidee buu nidaamka codbixintu isu beddelayaa?
- Yaa xaq u leh inuu codeeyo?
- Sidee bay isu beddeleen degaan-doorasho?
- Su'aalaha caadiga ah



# Maxay tani muhiim u tahay?

Wales waxay leedahay baarlamaan u gaar ah - Sennedka. Tani waxay ka dhigan tahay **Senedd, ma aha baarlamaanka UK**, waxay Wales u dejisaa sharciyo meelo badan oo ay ka mid yihiin:

- isbitaalada iyo GP-yada
- dugsiyada
- wadada iyo gaadiidka tareenada
- beeraha iyo xoolaha
- deegaanka
- Afka Wales

Sharciyada Wales waxay eegaan xaalada Wales, taasoo ka duwanaan karta qaybaha kale ee UK.

Sharciyada ay ansixiyeen Senedd, kuwaas oo khuseeya Wales laakiin aan ahayn England:

- Soo bandhigida kharashyada bacaha keli-kelida ee la isticmaalo (wadankii ugu horeeyay ee UK ee sidaas sameeya)
- Xawaaraha xadka leh ee 20mph
- Mamnuucida dharbaaxida

Tani waxay ka dhigan tahay Xubnaha aad dooranayso May 2026 waxay awood u leeyihiin inay go'aan ka gaadhaan waxyaalaha saameeya nolol maalmeedkaaga.

.

# Immisa xubnood ayaa Seneddku yeelan doonaa?

## Laga bilaabo doorashada May 7, 2026, Senedd wuxuu yeelan doonaa 96 xubnood halkii uu ka ahaa 60.

Muddo 25 sano ah, tirada xubnaha Senedd waxay ahaan jirtay sidii hore, in kasta oo ay hadda leedahay mas'uuliyado badan, sida awoodo sharci-dejinta oo buuxa iyo awoodda lagu beddelo cashuuraha Wales.

Lahaanshaha xubno badan waxay ka caawin doontaa Senedd si fiican u eegis iyo inay la doodo qorshayaasha **Dowalda Welsh** iyo kharashaadka arrimaha muhiimka ah sida isbitaallada, waxbarashada, iyo gaadiidka.

Tani waxay bulshadaada siin doontaa cod adag oo ku saabsan go'aamadan.

Iyadoo ay tahay 96 xubnood, tirada wakiilada aad ku yeelan doonto Senedd waxay la jaan qaadaysaa wadamada kale ee la siman Wales - sida Scotland oo leh 129 xubnood iyo Northern Ireland oo leh 90.

### Maxaa cusub

- Cod-bixiyayaasha ayaa dooran doona 96 xubnood.
- Waxaad ku yeelan doontaa lix xubnood oo ku metelaya Senedd.
- Musharixiinta u taagan doorashada waa inay ku noolaadaan Wales.

# Sidee buu nidaamka codbixintu isu beddelayaa?

## 2026, habka aad u codaynayso ayaa isbedeli doona.

Haddii aad ka weyn tahay da'da 16, waxaad ka codayn kartaa doorashada 2026 ee Senedd.

Waxaad heli doontaa hal cod oo aad ku doorato wakiilada bulshadaada Senedd.

Habka cusub ee codeynta waxaa loo yaqaan 'nidaamka liiska saamiga ee xiran'. Taas macnaheedu waa inaad u codaynayso xisbi siyaasadeed ama musharax madax banaan, halkii aad ka dooran lahayd dad gaar ah.

Warqada cod bixinta waxay tusi doontaa liiska buuxa ee musharaxiinta deegaankaaga, si aad wali u arki karto qofka aad u codaynayso.

Haddii xisbi uu ku guuleysto codad ku filan, wuxuu ku guuleysan doonaa hal ama dhowr kursi oo Senedd ah. Haddii musharrax madaxbannaan uu ku guuleysto codad ku filan, waxay ku guuleysan doonaan kursi Senedd.

Kuraasta ayaa ka tarjumaysa boqolleyda codadka xisbi kasta ama musharax madax banaani uu helo.

Wax badan ka ogow: **Sidee ayuu nidaamka cusub ee codbixintu ugu shaqayn doonaa doorashada soo socota ee Senedd?**

### Maxaa cusub

- Waxaad yeelan doontaa hal cod iyo warqad cod-bixineed si aad u dooratid wakiillada Senedd, halkii aad ka heli lahayd laba warqadood oo kala duwan sidii doorashooyinkii hore.
- Markaad codaynayso, waxaad dooranaysaa xisbi-siyaasadeed ama murashax madax-banaan oo aad doonayso inuu ku matalo.
- Laga bilaabo 2026, doorashooyinka Senedd waxay dhici doonaan afartii sanoba mar.

# Yaa xaq u leh inuu codeeyo?

Si aad u codayso doorashada Senedd ee 7da Meey 2026 waa inaad:

- da'daada tahay 16 jir ama ka weyn maalinta doorashada
- aad tahay **diiwaan gashan inaad codeeyso**
- British, Irish ama muwaadin Barwaaqosooranka u qalma, muwaadin Midowga Yurub, ama muwaadin ajnabi ah oo u qalma
- ku nool Wales

## Ma hubtid inaad xaq u leedahay?

Guddiga doorashadu waxay hayaan xog badan oo ku saabsan diiwaangelinta codbixinta boggooda:

**Idiwaangeli si aad u codayso | Guddiga doorashada**



# Sidee isku bedelayaan degaan doorashadu?

## Wales waxay yeelan doontaa 16 degaan-doorasho halkii ay ka ahaan lahayd 40.

Mid kasta oo ka mid ah degaan-doorashan cusub waxay yeelan doonaaa lix xubnood, taasoo ka dhigaysa 96 xubnood oo loo doortay Senedd.

**Guddiga Dimuqraadiyadda iyo Xuduudaha ee Cymru** ayaa abuuray aagagga cusub iyagoo ku lammaaniyay 32 xubnood ee baarlamaanka UK ee Wales. Waxay kaloo tixgeliyeen xuduudaha maxalliga ah, isku xirka waddooyinka iyo gaadiidka, iyo astaamaha dabiiciga ah sida webiyada iyo buuraha.

## Degaanada-doorashada ee Senedd ee doorashada 2026:

1. Bangor Conwy Môn
2. Clwyd
3. Fflint Wrecsam
4. Gwynedd Maldwyn
5. Ceredigion Penfro
6. Sir Gaerfyrddin
7. Gŵyr Abertawe
8. Brycheiniog Tawe Nedd
9. Afan Ogwr Rhondda
10. Pontypridd Cynon Merthyr
11. Blaenau Gwent Caerffili Rhymni

**12.** Sir Fynwy Torfaen

**13.** Casnewydd Islwyn

**14.** Caerdydd Penarth

**15.** Caerdydd Ffynnon Taf


**16.** Pen-y-bont Morgannwg

Waxaad ka heli kartaa degaan-doorashaada cusub adiga oo geliya boost koodkaaga ee **qariidada helitaanka degaan-doorshadah.**

## Maxaa cusub

- Wales waxay yeelan doontaa 16 degmo doorasho.
- Degmo kasta waxay dooran doontaa lix xubnood oo Senedd ah.

**Dhammaan isbeddelladan waxay ka dhigan yihiin matalaad xooggan adiga, qoyskaaga iyo bulshadaada.**



# Su'aalaha caadiga ah

## Goorma ayaa la qaban doonaa doorashada la soo diray ee 2026?

7 May 2026.

## Dhismaha Senedd ma u baahan doonaa inuu isbedelo?

Xafiiska doodwadaaga ee Senedd, Siambr, waa la beddeli doonaa si loo qaabilo dhammaan 96 xubnood. Shaqadu waxay bilaaban doontaa Abriil 2025 waxaana la dhameeyn doonaa guga 2026.

**Su'aalaha caadiga ah ee dheeraad >**